

A nighttime photograph of the Boston waterfront, featuring a mix of historic and modern architecture. The water in the foreground is dark, reflecting the lights from the buildings and streetlights. A large, multi-story building with many windows is prominent on the left. In the background, several tall skyscrapers are visible against the dark blue sky. The overall scene is illuminated by a cool, blue light, creating a serene yet vibrant atmosphere.

GEEDI-SOCODKA MISAANIYADA IYO SIDA LOO HAWL GALO



City of Boston
Budget

Waa maxay miisaaniyadu?

Miisaaniyadu waa **dukumeenti maaliyadeed**, laakiin sidoo kale waa **bayaan mudnaanta leh**.

Miisaaniyaddu waxa ay tix-raacdaa **adeegyada maalinlaha ah** ee la bixiyo iyo **maalgelinta muddada dheer** ee hantida raasamaalka ah.

**Maxaad rajaynaysaa
inaad ka baxdo kulanka
xog kala helida maanta?**


SOOYAALKA MIISAANIYADA



WAA MAXAY “sannad XISAABEEDKA?”

Muddada maaliyadeed ee laba iyo tobanka bilood ahayd ee ay isticmaasho Magaaladu waxay bilaabmaysaa Luulyo 1 waxayna dhammaanaysaa Juun 30 ee sannadka soo socda.

Sannad-maaliyadeedka Magaaladu waxa loo tiriya iyadoo loo eegayo sannadka uu dhammaanayo.



LABADA MIISAANIYADOOD EE AASAASIGA AH EE BOSTON

	MIISAANIYADA SHAQAYNAYSA	QORSHAHA RAASAMAALKA
<i>Kharash</i>	Waxa ay Magaaladu filayso in ay ku bixiso adeegyada iyo qalabka maalinlaha ah ee sannadka	Qorshe sannado badan ah oo ku saabsan sida loo sameeyo maalgashi wakhti dheer ah (sida dugsiyo cusub, jardiinooyin, iyo mashaariic guryaha)
<i>Dakhliga</i>	Dakhliga ay hesho Magaaladu si ay u maalgeliso miisaaniyada lagu shaqeeyo (laga bilaabo ilaha sida cashuuraha guryaha, ama kaalmada gobolka, khidmadaha iyo ogolaanshaha)	Dakhliga laga helo miisaaniyada lagu shaqeeyo waxa loo isticmaalaa in lagu bixiyo curaarta dawladda hoose ee maalgeliya inta badan mashaariicda raasamaalka

SIYAASADDA & QAYBAHA BARNAAMIJKA EE MIISAANIYADAHA BOSTON

Miisaaniyadda hawsha Magaalada iyo sanduuqa qorshaha raasamaalka...



FANKA IYO DHAQANKA



SINNAANTA



DHAQAALAHA



CAAFIMAADKA



WAXBARASHADA



GURYO



**TAMARTA, DEEGAANKA,
IYO JARDIINOYINKA**



**BADBAADADA
DADWEYNAHA**



GAADIIDKA



**Maxay yihiin qaar ka
mid ah kaabayaasha
ama adeegyada
magaalada ee
maskaxda ku soo
dhacaya?**


**Miisaaniyaddee ayaad
aaminsan tahay inay
hoos imaadaan?**




QAYBAHA MIISAANIYADA HAWSHA EE BOSTON

MIISAANIYADDA WAXQABADYADA

FY23




DAKHLIGA FY23



- WAXBARASHADA DADWEYNAHA
- QARASH GO'AN
- BADBAADADA DADWEYNAHA
- WAAXAHA MAGAALADA
- CANSHUURTA GURIGA
- KAALMADA GOBALKA
- DAKHLIGA GUDAHA
- AAN SOO NOQNOQOON
- CAYMISKA CAAFIMAADKA
- CAAFIMAADKA DADWEYNAHA
- GAADIIDKA

MIISAANIYADA RAASAMAAL EE BOSTON

- Mashaariicda badankoodu waxay ku bilowdaan weji naqshadayn ka dibna waxay u gudbaan dhismaha
- Mashruucyo waaweyn oo kakan ayaa qaata waqti dheeraad ah in la dhammaystiro oo inta badan waxay u baahan yihiin marxalad waxbarasho
- Aqoonso dhibaato ama wax ku walaac geliya
- Meesha dhibaatudu ka jirtaa ma tahay hanti ay magaaladu leedahay? (City park v. DCR park)
- Maalgelinta mashaariicda lagu taliyey waxay ku xidhan tahay taageerada Golaha Deegaanka



Ka eeg mashaariicda qorshaha raasamaal ee hadda onlayn barta:

boston.gov/departments/budget/fy23-capital-budget



**Maxaa kaa yaabinaya
oo ku saabsan saamiga
kala duwan ee
miisaaniyadda?**

**Maxaa kaa yaabiyay
marka la eego dakhliga
magaalada?**



ISBEDELADII DHAWAA EE JAATARKA

- Natiijada Codbixinta 1 ee ansaxmaysa Noofambar 2021, golaha magaaladu hadda wuu diidi karaa, dhimi karaa, gudbin karaa, ama wax ka beddeli karaa waxyaabaha (sida akoonada sida shaqaalaha, adeegyada qandaraaska, qalabka, iwm) ku jira Miisaaniyadda Magaalada.
- Wax ka bedelka miisaaniyada waxay ka dhigan tahay in Goluhu dhimi karo miisaaniyada waaxyaha qaarkood, qaar kalena kordhin karaan, ilaa inta ay ku jirto wadarta guud ee miisaaniyada magaalada ee uu soo gudbiyay Duqa Magaalada.
 - Inta lagu jiro dhageysiga miisaaniyada, waxaad hadda waydiisan kartaa xildhibaanada inay kordhiyaan ama dhimaan miisaaniyada waaxyaha ee ujeedooyin gaar ah loo adeegsanayo.
- Codbixinta 1 waxa kale oo uu u baahan yahay in la sameeyo **Xafiiska Ka Qaybqaadashada Miisaaniyadda** oo u furan dhammaan dadka deggan Boston Juliaay 1, 2023 (bilawga FY24)



SAAMAYNTA MIISAANIYADA



Hubinta:

*Miyaad ku hawlan tahay
miisaaniyadda ama
adeegyada ay bixiso?*


Waqti kasta oo sannadka ah,
magaaladu waxay u furan
tahay jawaab celinta ku
saabsan adeegyada, kuwaas oo
laga yaabo inaanay ku
xidhnayn wareegga
miisaaniyada.



FIKRADDA DADWEYNAHA AY KU DARSANAYAANMIISAANIYADDA

Fikradda dadweynaha ay ku darsanayaan miisaaniyaddu waxay dhacdaa sannadka oo dhan, iyadoo Magaaladu ay la macaamilayso xubnaha.

Si kastaba ha ahaatee, way sii xoogaysataa xilliga Jiilaalka, marka Duqa magaalada samaynayo miisaaniyada, iyo xilliga Gu'ga, inta Goluhu dib u eegayo.



JADWALKA SAMAYNTA MIISAANIYADA

LUULYO 1

Maalinta koowaad ee Sannad-maaliya deedka

Bartamaha-Abriil


Duqa magaalada wuxuu soo gudbiyaa Miisaaniyada Lagu taliyay

HORAANTII JUUN

Golaha Magaaladu waxa uu ku dhaqmaa Miisaaniyadda lagu taliyay

LUULYO 1

Maalinta koowaad ee Sannad-maaliyad eedka Cusub



Sida Loola Xidhiidho Magaalada Wakhti kasta

Ku Xidhnow Wakiiladaada

Golaha Deegaanka

- 13-ka xildhibaan waxay abuuraan, ansixiyaan, waxna ka bedelaan sharciyada deegaanka, iyo sidoo kale waxay ansixiyaan miisaaniyada Magaalada sannad walba. Golaha Magaaladu waa hay'adda sharci-dejinta, xildhibaanada golaha deegaanka waxa la soo doortaa labadii sanaba mar.
- Ka ogow cidda uu yahay Golaha Deegaanka barta [Boston.gov/City-Council](https://www.boston.gov/city-council)

Isku xirka Xaafada ama Bulshada

- Xaafadaha iyo bulshooyin qoomiyado badan kasoo jeeda ayaa leh xiriiriye si ay kuugu xiraan magaalada adiga ama magaaladaba adiga. Waxay u jiraan inay kaa caawiyaan in codkaaga la maqlo!
- Kala xidhiidh xiriiriyahaaga Xafiiska Adeegyada Xaafada adoo wacaya 617-635-3485 ama booqo [Boston.gov/ONS](https://www.boston.gov/ONS)

La xidhiidh 311

3-1-1 waa lambar talefoon oo fudud oo kugu xiraya shaqaalaha Magaalada Boston oo diyaar u ah inay kaa caawiyaan adeegyada aan degdegga ahayn ee magaalada iyo codsiyada macluumaadka.

- Soo degso ablikeeshinka Boston 311
- Ka wac 311 Gudaha Xadka Boston
- Booqo [Boston.gov/311](https://www.boston.gov/311)
- Naga soo ogeysii Twitter: @BOS311

Hawlgelinta Magaalada Noofambar/Diisambar

- Waaxyahu waxay qoraan oo soo gudbiyaan miisaaniyadooda horraanta Janaayo, marka laga reebo BPS.
- La xiriir waaxyaha magaalada Noofembar iyo Diisambar si aad ula xiriirto waxaad jeceshahay inaad aragto in la codsado. Wixii BPS ah, horraanta dayrta ayaa ugu fiican.
- La xiriir waaxaha adoo kala xiriiraya ONS/311, ama ka hel macluumaadka xidhiidhka qaybta websaydka.
- Ka qaybgal xafladaha ay qabtaan waaxaha meelaha siyaasadda aad danaynayso, oo la hadal masuuliyiinta magaalada ka hor, inta lagu jiro ama ka dib dhacdada sida ku habboon.



Sheekada Guusha Ka-qaybgalka Miisaaniyadda:

Ganacsatada warshadaha xashiishadda ayaa wadaagay heerka ay raasamaalka hore u abuurayso kala duwanaanshiyaha warshadaha.

Magaaladu waxay maqashay cabashooyinkan, Xafiiska Fursadaha Dhaqaale iyo ka Qaybahaanshiyaha ayaa sii wada raadinta habab lagu kordhinayo lacagta deeqda ah ee ganacsatadan.




Badhtamaha Abriil waxay calaamad u tahay isbeddelka Samaynta Miisaaniyadda ee Maamulka (Maayarka, Xafiiska Miisaaniyadda) ee ku wajahan Golaha Deegaanka. Duqa magaalada waxa uu keenaa miisaaniyada ka dibna Golaha Magaalada ayaa dib u eegis iyo isbeddelo farshaxan ah keena.

Sawirka Dhanka Midig: Quraacda Miisaaniyadda Sannadlaha ah oo ay isugu yimaadaan Madaxda Golaha Wasiirrada, Xildhibaannada Golaha Deegaanka, Maayarka iyo Xafiiska Miisaaniyadda si ay uga wada hadlaan Miisaaniyadda la soo jeediyay.



Ka-qaybgalka Magaalada Abriil/Meey

- Inta lagu jiro muddadan, golaha Magaaladu waxa ay dib u eegis ku samaynayaan miisaaniyada uu soo jeediyay Duqa magaalada waxayna wacayaan shaqaalaha magaalada si ay uga hadlaan una bixiyaan macluumaad dheeraad ah.
- La xiriir magaalada bilaha Abriil iyo Maayo si aad ugu sheegto Golaha Magaalada waxaad jeceshahay inaad ku aragto miisaaniyada.
- Soo gudbi ama isdiiwaangeli si aad uga hadasho dhageysiga miisaaniyada dadweynaha.



Committee on Ways and Means ayaa qabata dhageysiyada miisaaniyadeed. Gudoomiyaha (sawirka) ayaa hogaaminaya shirka. Sawirka kore waxaa laga soo qaatay dhageysigii 4.25.22

Sida Looga Qayb Qaato Dhagaysiyada Miisaaniyada

boston.gov/budget-testify

Xulashooyinka:

- **Iimayl** toos ugu dir ciwaanka **ccc.wm@boston.gov**
- **Soo gudbi fiidiyow duuban** ugu yaraan laba maalmood oo shaqo ka hor dhegeysiga
 - Ku soo gudbi linkiga bogga kor ku xusan
- **Uga qaybqaado si toos ah** Dhagaysiga
 - Hel Iannella Chamber, Fifth Floor, Boston City Hall. Iska qor xaashida u dhow albaabka qolka 15m ka hor inta uusan shirku bilaaban.
- **Onlayn uga qaybqaado** Dhagaysiga
 - Iska qor adigoo isticmaalaya linkiga onlaynka ah ee ku jira linkiga sare.



Madalka markhaatiga dadwaynaha istaago waxa ay ku taalaa gadaasha kuraas saf ah oo ku yaala cidhifka dambe ee qolka. Sawirka kore waa Henry Santana, Agaasimaha Abaabulka Bulshada, oo ka marag kacaya dhageysiga miisaaniyada 5.6.22. Madalka la istaago iyo makarafoonka ayaa si toos ah uga dambeeya isaga.

Sheekada Guusha Ka-qaybgalka Miisaaniyadda:

Milkiilayaasha makhaayadaha ayaa isu yimid oo ka dhawaajiyay baahida loo qabo taageero inta lagu jiro cudurka faafa. Waxay ku biireen Restaurant Roundtable (Wada xaajoodka makhaayadda) ee 2021.

Natiijo ahaan, Xafiiska Fursadaha Dhaqaale iyo ka mid noqoshada ayaa abuuray [Sanduuqa Gargaarka Makhaayada](#).



Cusboonaysiinta Miisaaniyadda Ka Qaybqaadashada (PB)

- Wax ka beddelka jaartarka cusub wuxuu u baahan yahay abuurista Xafiiska Miisaaniyadda ka qaybqaadashada oo u furan dhammaan dadka deggan Boston badhtamaha sannadka 2023.
- Magaaladu waxay ka shaqaynaysaa sidii loo hirgalin lahaa qaab dhismeedka PB hannaan siman dadkana isu keenaya oo u furan dhammaan dadka deggan Boston FY24 (Luulyo 1, 2023).
- La soco wixii ku soo kordha, oo xor u noqo inaad la xidhiidho xafiiska miisaaniyada si aad u hesho warar cusub.



Waxqabadka

A blue-tinted photograph of a city street. In the foreground, a dark, ornate metal fence with pointed finials runs across the frame. Behind the fence, a row of multi-story buildings with various architectural styles, including bay windows and fire escapes, is visible. The sky is clear and blue.

**Dhacdooyinka
ka-qaybgalka**



Doortaha wuxuu leeyahay fikrado ku
saabsan sida ay magaaladu
dib-u-qaabayn karto isgoysyada
taraafiga si loo hagaajiyo ammaanka.

Tani miyay u egtahay mashruuc
raasamaal (capital project) ama
maalgelin hawleed (operating
investment? Waaxdee ayay la xiriiri
lahaayeen, sideese?

Dhacdada 1aad

Doortuhu waxuu rabaa barnaamij
diiradda lagu saarayo xirfadlayaasha
soogalootiga ee ka socda qayb ka
mid ah adduunka si loo ballaariyo oo
loo taageero soogalootiga meelaha
kale ka socda.

Waa Febraayo, waana ka dib marka
waaxdu soo gudbiso codsigooda
miisaaniyadeed.

Sidee ayay tahay in doortahani uga
qayb-qaato?

Dhacdada 2aad

Doortuhu waxuu raba inuu siiyo
magaalada ra'yi-celin ku saabsan
sida loo horumariyo luuqada si
qofkastaaba u fahmi karo.

Qofkani ma u baahan yahay inuu ka
fiirsado wareegga horumarinta
miisaaniyada iyo sida looga
qaybqaato?

Dhacdada 3aad

Mahadsanid.